# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـــدة الرسميـــة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 15aad, Muqdisho, 14ka Disembar 1987, L. 1 R 12

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii

sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 23 ee 13 Nof. 1987, Oggolaansho Heshiis Amaaheed oo dhexmaray JDS iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah IDA. Bog; 946

SHARCI L. 24 ee 13 Nof. 1987, Oggolaansho dhaqan ku meel gaar ah Xeerka Sharci Lr. 1 ee 1da Agoosto 1987, wax ka bedelidda Canshuurta Keenidda. » 947

SHARCI L 25 ee 29 Nof. 1987, Oggolaansho Isbeddelka 1aad ee Miisaaniyadda Qaranka 1987. » 948

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 48 ee 13 Nof. 1987, Meel marin Heshiiska Amaaheed oo dhexmaray JDS iyo Ururka H. Caalamiga. » 949

**Wakaaladda Madbacadda Qaranka**

| | | |
|---|---|---|
| XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 49 ee 17 Nof. 1987, Xeerka Madaxweynaha oo lagu dhisay Guddi loo xil saaray Dib u habaynta Jinsiyadda Muwaadinka Soomaaliyeed. | » | 950 |
| QAYBTA | | SAD/XAAD |
| TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM. | | |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.10 86, Naado Dhul J.le Maxamuud Xasan Maxamed L.389 | » | 952 |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 28.10 86, Naado Dhul J.le G/le Siyaad Daa'uud Gudaal L.390 | » | 953 |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 11.12.86, Naado Dhul J.le Cabdi Cusmaan Maxamuud L.391 | » | 954 |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 11.12.86, Naado Dhul J.le Sheekh Cumar Cali L. 392 | » | 955 |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.11.86, Naado Dhul J.le Caasha Siid Axmed L. 393 | » | 956 |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 19.11.86, Naado Dhul J.le Cabdullaahi X Raage 394 | » | 957 |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 9.11.86, Naado Dhul J.le Cali Tarmuum Cawad L. 395 | » | 958 |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 1.12.86, Naado Dhul J.le Xaaji Muumin Macalin L. 396 | » | 959 |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 1.12.86, Naado Dhul J.le G/le Sare Nuur Xasan Looyaan L. 397 | » | 960 |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 1.12.86, Naado Dhul J.le Xaawo Muuse Cali L. 398 | » | 961 |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 1.12.86, Naado Dhul J.le Cabdi Cigaal Xasan L. 399 | » | 962 |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 3 12.86, Naado Dhul J.le Maxamed Daahir Dheere L. 400 | » | 963 |
| DAWLADDA HOOSE MUQ. 21.12.86, Naado Dhul J.le Maxamuud Maxamed Diiriye L.401 | » | 964 |

DAWLADDA HOOSE MUQ. 21.12.86, Naado Dhul J.le Shariif Maxamed Axmed L. 402 » 965

DAWLADDA HOOSE MUQ. 21.12.86, Naado Dhul J.le Cabdi Nuur Cali L. 403 » 966

DAWLADDA HOOSE MUQ. 21.12.86, Naado Dhul J.le Khadiija Siidow Xaaji L. 404 » 967

DAWLADDA HOOSE MUQ. 21.12.86, Naado Dhul J.le Maxamed Cabaas Suufi L. 405 » 968

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 28.11.87 Lumid 3 Jeeg War. ku qoran Cabdirashiid Maxamed Diiriye L. 406 » 969

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 21.11.87, Lumid Buug Kayd L 6480 ku qoran Cali Xasan Faarax L. 407 » 970

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 17.11.87, Lumid Jeeg War. L. 0679015 ku qoran Isaaq Rooble Maxamed L. 408 » 971

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 23.11.87, Lumid Jeeg War. L. 0580359 ku qoran Maxamed Colow Guuleed L. 409 » 972

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 21.11.87, Lumid Jeeg War. L. 0556180 ku qoran Awaloow Shariif Maxamed L. 410 » 973

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 28.11.87, Lumid 2 Buug Kayd ku qoran Cabdulle Cabdi Ibraahim L. 411 » 974

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 28.11.87, Lumid Buug Kayd L. 18485 ku qoran Suleymaan Cabdulle Cabdi L. 412 » 975

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 25.11.87, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Xasan Yuusuf Ismaaciil L. 413 » 976

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 18.11.87, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cabdullaahi Macalin Maxamuud L. 414 » 977

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.11.87, Lumid Jeeg War. L. 0712112 ku qoran Cali Maxamed Faarax L. 415 » 978

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.11.87, Lumid Jeeg War L. 0380651 ku qoran Baasha Maxamed Faarax L. 416 » 979

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.11.87, Lumid Buug Kayd L. 27077 ku qoran Maxamed Axmed Faarax L. 417 » 980

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 1.12.87, Lumid 2 Jeeg War ku qoran Canab Axmed Xersi L. 418 » 981

MAXKAMADDA G. W. GALBEED, 28.11.87, Lumid Jeeg War. L. 0519904 ku qoran Maxamed Yoonis Warsame L. 419 » 982

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 22.11.87, Lumid 4 Jeeg War. 3 ku qoran Maxamed Xuseen Maxamuud, midka kale ku qoran Xasan Axmed Muuse L. 420 » 983

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.12.87 Lumid Jeeg War. L. 0885624 ku qoran Xu. Maxamed Maxamuud L. 421 » 984

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.12.87, Lumid Jeeg War. L. 0539805 ku qoran Nuur Maxamed Maxamuud L. 422 » 985

QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

Sharci lambar 23, taariikh 13 Nof. 1987, Ogggolaansho Heshiis Amaaheed oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqoraadiga Soomaaliya iyo Ururka Horumarinta Caalamiga «Mashruuca Beereedka Roobka».

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiiska Amaaheed oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya iyo Urur ka Horumarinta Caalamiga (IDA) kuna saabsan amaah lacageed oo dhan SDR 10.600.000/= oo loogu tala galay «Tijaabada Mashruuc Beereedka Roobka ku baxaya oo qalab iyo gacan ah».

2. Heshiiska waxaa lagu kala saxiixday Magaalada Kolumbiya ee Dalka Mareykanka, taariikhdu markay ahayd 13kii Abriil 1987.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay Sharcigan isagoo lifaaq u ah.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay tilmaamayaan heshiiska ku qoran qodobka 1aad ee Sharcigan, waxaa dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraa diga Soomaaliya iyo qodobbadaheshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaamaaliya, waxaa awood loo siiyay inuu meel-mariyo heshiiskan.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13 Nov 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Sharci lambar 24, taariikh 13 Nof. 1987, Oggolaansho dhaqan ku meel gaar ah Xeerka Sharci lr. 1 ee 1da Agoosto 1987 «Wax ka bedelidda Canshuurta Keenidda».-

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa Dawladda loo oggolaaday in si ku meel gaar ah loogu dhaqmo Xeer-Sharci lr. 1 ee 1da Agoosto 1987 «Wax ka bedelidda Canshuurta Keenidda» oo dhacay inta aan loo rogin Sharci Rasmi ah.

Qod. 2aad

Ku dhaqanka ku meel gaarka ah ee Xeer-Sharciga ee qodobka 1aad ku tilmaaman, wuxuu socon doonaa ilaa iyo 31ka Disembar 1987, waxayna Dawladdu awood u leedahay in ay muddadaas dhexdeeda ku cusbooneysiiso Xeer-Sharcigaas ama hor-dhigto Golaha Shacbiga Mashruuc Sharci cusub oo khuseeyo wax ka bedelidda canshuurta keenidda oo xusnaa Xeer-Sharciga dhacay.

Qod. 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 1da Agoosto 1987, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.-

Muqdisho, 13 Nof. 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

Sharci lambar 25, taariikh 29 Nof. 1987, Oggolaansho Is-beddelka 1aad ee Miisaaniyadda Qaranka 1987.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa la oggolaaday Is-beddelka 1aad ee Miisaaniyadda Qaranka 1987, sida ku tilmaaman lifaaqa Sharcigan.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 29 Nov. 1987

MADAXWEYNAHA JDS

(Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

# X E E R

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 48, taariikh 13 Nof. 1987 Meel-marinta Heshiiska Amaaheed oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Ururka Horumarinta Caalamiga «Mashruuca Beereedka Roobka».-

## MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 67, faqradda 5 iyo Qodobka 82, faqradda 4 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disembar 1984, kuna saabsan wax ka bedelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 23 taariikh 13.11.87 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiskan;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay laga maarmaan tahay in heshiiskan la meel-mariyo;

## WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

### Qod. 1aad

Waxaa la meel-mariyay heshiiska amaaheed oo dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Ururka Horumarinta Caalamiga (IDA) oo lagu kala saxiixday Magaalada Kolumbiya ee Dalka Mareykanka taariikhdu markay ahayd 13kii Abriil 1987, looguna tala galay Mashruuca Beereedka Roobka.

### Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelanayaa Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya awood Sharci ah.

### Qod. 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13 Nov. 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 49 ee 17 Nof. 1987, Xeer Madaxweyne oo lagu dhisay Guddi loo xilsaaray Dib-u-Habeynta Jinsiyadda Muwaadinka Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 28aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharci Lam. 28 ee 22.12.1962, iyo Sharciyadii ka dambeeyey laguna habeeyey;

MARKUU TIXGELIYEY: Talada Golaha Dhexe XHKS, iyo tan Golaha Wasiirada, iyo xog-warranka Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

WUXUU XEERIYEY

Qod. 1aad

Waxaa Xeerkan lagu dhisay Guddi lagu magacaabo Guddiga Habaynta Jinsiyadda Muwaadinka Soomaaliyeed oo loo xilsaaray:-

b) — Dib-u-habaynta Shuruucda saameysa Jinsiyadda Muwaadinka Soomaaliyeed;

t ) — Samayn Sharci daryeelaya xuquuqda Jaaliyadaha Soomaaliyeed oo dalalka Shisheeyaha ku dhaqan;

j ) — Tirakoobka Ajnebiga ku dhaqan Soomaaliya tiradooda, hantidooda, shaqadooda, iyo wax kasta oo la xiriira;

x) — Wax kastoo Guddigu u arko inay saamaynayaan waajibaadka loo xilsaaray

Qod. 2aad

Xarunta Guddiga waxay noqonaysaa Magaala Madaxda JDS, (Muqdisho) wuxuuna Laamo ku yeelan karaa Gobollada iyo Degmooyinka oo dhan.

Qod. 3aad

Guddiga wuxuu ka kooban yahay:-

| | |
|---|---|
| 1)— J.le Maxamuud Geelle Yuusuf | Guddoomiye, |
| 2)— J.le Maxamed Jibriil Muuse | Xubin, |
| 3)— J.le Maxamed Maxamuud Warsame | Xubin, |
| 4)— J.le Dr. Maxamed Cali Xaamud | Xubin. |

Qod. 4aad

Guddigu wuxuu yeelan karaa Guddi-Hoosaadyo ku gacan siiya gudashada xilkiisa xagga Farsamada, aqoonta, iyo wax kastoo looga baahdo.

Qod. 5aad

1. Guddoomiyaha Guddiga ku xusan qod. 3aad ee Xeerkan waxaa awood loo siiyey Magacaabidda Xubnaha Guddi-Hoosaadyada ku xusan Qod. 4aad ee isla Xeerkan, waxayna hoos imaanayaan Guddiga oo ay tilmaantiisa ku shaqayn doonaan.

2. Qof kastoo loo magacaabo inuu ka mid noqdo Guddi-Hoosaadyada, waxaa khasab ku ah inuu u hoggaansamo gudashada xilkaas hor-u-marintana siiyo.

Qod. 6aad

Kharajka hawlgalka Guddiyada Xeerkan ku xusan waxaa bixinaya Wasaaradda Maaliyadda.

Qod. 7aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya

Muqdisho, 17.11.1987

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

## QAYBTA SADDEXAAD

### TALOOYIN ISGAARSIIN OG. IYO WIXII LA MID AH.

### DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
### QAYBTA DHULKA RASMIGA AH
### N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Maxamuud Xasan Maxamed uu soo qortay Arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalinta taariikhdu ahayd 12.10.86 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retangolare Addimihiisuna yihiin 24X12 kuna fadhiya 288 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid

Koofur waxaa ka xiga: Jid

Galbeed waxaa ka xiga: Gur. Maxamed Iimaan

B a r i waxaa ka xiga: Jid

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karii muddo (30) Soddon Maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho, 28 Oct. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE EE XAMAR
J.le Xuseen Axmed Aadan

L. 389

# DAWLADDA HOOSE XAMAR
# QAYBTA DHULKA RASMIGA AH
# N A A D O    D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le G/le Siyaad Daa'uud Gudaal uu soo qortay Arji Waaxda dhulka rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalinta taariikhdu ahayd 4.12.87 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Retangolare Addimihiisuna yihiin 4,50X30 kuna fadhiya 135 MQ.

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN**

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lamb. 136

Koofur waxaa ka xiga: Dhul lamb. 134

Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 131

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiiuan uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 28 Oct. 1986

**AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE EE XAMAR**

J.le Xuseen Axmed Aadan

L 390

**DAWLADDA HOOSE EE XAMAR**
**WAAXDA DHULKA RASMIGA AH**
**N A A D O   D H U L**

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabdi Cismaan Maxamuud iyo Shirkaddiisa, Cabdi Xasan Buuni iyo Shirkaddiisa Abuukar Weydow Axmed iyo Qoyska Weydow iyo Axmed Maxamed Cabdi iyo Shirkaddiisa uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 20.10.1984 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hodan Wadda da isku xirta Afgooye — Xamar, Qaabkiisuna waa Afar Trabezio, Addimihiisuna waa sidatan:

(A) $\frac{(110+65)X150}{2} + \frac{(175+110)X240}{2} + \frac{(110+65)X350}{2} +$

$\frac{(140+50)X140}{2}$ kuna fadhiya MQ. 89.500/=

(B) Qaabkiisu Rettangolo, Addimihiisuna waa 290X100 kuna fadhiya MQ. 29000/=.

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN**

QEYBTA (A)

Waqooyi waxaa ka xiga: Goof dad
Koofur waxaa ka xiga: Xuseen Kulmiye, Nadiifo iyo Weydow
Galbeed waxaa ka xiga: Jid
B a r i waxaa ka xiga: Goof dad

QEYBTA (A)

Waqooyi waxaa kaxiga: Goof dad
Koofur waxaa ka xiga: Warshad
Galbeed waxaa ka xiga: Goof
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

**Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa mudde (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.**

Muqdisho, 11.12.1986

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE EE XAMAR
(Jeom. Aadan Xaashi Nuur)

**DAWLADDA HOOSE XAMAR**
**QAYBTA DHULKA RASMIGA AH**
**ÑAADO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in J.le Sheekh Cumar Cali uu soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 17.10.86 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Boondheere qaabkiisuna yahay Trabezio addimihii-suna yihiin (12+10)X12 kuna fadhiya 132 MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddada Nasiib Buundo

Koofur waxaa ka xiga: Guriga X. Yabarow

GaGlbeed waxaa ka xiga: Masaajid

B a r i waxaa ka xiga: Guri dad

**Qofkii daneynaaya** dhulkaa wuxuu si fiiuan **uga arki karaa Naqshadda dhulka** oo taal Waaxda **Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar,** waxaana laga doodi karaa muddo (30) **soddon maalmood, laga** bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga **Faafinta Rasmiga ah.**

Muqdisho, 11 Dec. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
(J.le Aadan Xaashi Nuur)

L. 392

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J.le Caasha Siid Axmed ay soo qoratay Arji una soo qoratay Waaxda Dhulka Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayad 9.11.86 ay ku weydiisatay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Qaabkiisu yahay Elle addimihiisuna yihiin Mt. (26X7) + (16X30) kuna fadhiya mq. 362

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koofur waxaa ka xiga: Guri dad

Galbeed waxaa ka xiga: Guri dad

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D. Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 19 Nov. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA D/HOOSE

J.le Xuseen Axmed Aadan

L. 393

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabdullaahi X. Raage Wehliye uu soo qortay Arji una soo qortay Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho, maalintii taariikhdu ahayd 28.10.86 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed oo ku yaal Muqdisho Degmdaa Wadajir Qaabkiisu yahay Afar gees addimihiisuna yihiin 20X20 kuna fadhiya mq. 400.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Laanta J/Daa'uud

Koofur waxaa ka xiga: Guri dad kale

Galbeed waxaa ka xiga: Guri dad kale

B a r i waxaa ka xiga: Waddada Laamagia Madiina

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karii muddo (30) Soddon Maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho, 18 Nov. 1986
AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE EE XAMAR
J.le Xuseen Axmed Aadan

L. 394

DAWLADDA HOOSE XAMAR

QAYBTA DHULKA RASMIGA AH
N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cali Tarmuum Axmed Cawad uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii Taariikhdu ahayd 28.10.86 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Shibis Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 12x11 kuna fadhiya mq. 132
SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Guri

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiiuan uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.
Muqdisho, 9 Nov. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
J.le Xuseen Axmed Aadan

L. 395

DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J/le X. Muumin Maclin Cali uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/H. ee Muqdisho maalintii taarikhdu ahayd 22.8.86 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Wadajir Qaabkiisuna yahay Rettangolare Aadimiinsuna yihiin 27x13 kuna fadhiya 351/Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri Dad

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Guri Dad

B a r i Waxaa ka xiga: Guri Dad

Qofkii daneynaayo dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhulka ee WHG/-Guri.Gob/Sh/Hoose Deg. Marka-Shalambood. Waxaana laga doodi karaa muddo ku siman soddon (30) maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo daabaco Buugga Faafinta Sharciyada Rasmiga ah.

Muqdisho, 1 Dec. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA DHULKA D/HOOSE EE XAMAR

J.le Xuseen Axmed Aadan

L. 396

## DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
## WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J/le G/Sare Nuur Xasan Looyaan uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 1.10.86 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisu na yihiin 45x15 kuna fadhiya mq. 675

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri Dad

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri Dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Guriga Dhulkiisi Hore

**Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo yaal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa mudda (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.**

Muqdisho, 1 Dec. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Cabdi Abshir Yuusuf

L. 397

**DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO**
**WAAXDA DHULKA RASMIGA AH**

**NAADDO DHUL**

Waxaa la caddeynayaa in J/le Xaawo Muuse Cali uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 17.10.86 uu ku weydiis tay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hiido Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 19x10 kuna fadhiya mq. 190

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Dad

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhulkeedi Hore

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karii muddo (30) Soddon Maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho, 1 Dec. 1986.
AGAASIMAHA WAAXDA M/ DHULKA EE D/ HOOSE
(J.le **Maxamuud Cabdi Cismaan**)

L. 398

## DAWLADDA HOOSE EE XAMAR
## WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
## N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabdi Cigaal Xasan uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 17.6.86 uu ku weydiis tay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada W/Afgooye Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 188,50x100 kuna fadhiya mq. 18850

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Goof Dad

Koonfur Waxaa ka xiga: Wadada Afgooye

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhulka Cali Jiinow

B a r i Waxaa ka xiga: Jid

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiiuan uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 1 Dec. 1986.

AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE
Jeom. Cabdi Abshir Yuusuf

L. 399

DAWLADDA HOOSE XAMAR
QAYBTA DHULKA RASMIGA AH
N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Daahir Dheere uu u soo qortay arji Waaxda dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 9.10.86 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Deg. Shibis Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihin 12x6 kuna fadhiya mq. 72

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Guri Dad

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri Dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Guri Dad

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga billaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 3 Dec. 1986.
AGAASIMAHA WAAXDA M/DHULKA EE D/HOOSE

J.le Xuseen Axmed Aadan

L. 400

**DAWLADDA HOOSE EE XAMAR**
WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
N A A D O  D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamuud Maxamed Diiriye uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 13.12.86 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisu na yihiin 20x15 kuna fadhiya mq. 300

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 869. B

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 875. B

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 872. B

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiiuan uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 21 Dec. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMLLKA DHULKA D/HOOSE
J/le Aadan Xaashi Nuur

L. 401

## DAWLADDA HOOSE XAMAR

## QAYBTA DHULKA RASMIGA AH

## N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J/le Shariif Maxamed Axmed uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/H ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 16.12.86 uu ku weydiis tay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 29x58 kuna fadhiya mq. 1682

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN**

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri Dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Guri Dad

B a r i Waxaa ka xiga: Guri Dad

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiiuan uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 21 Dec. 1986

**AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA D/HOOSE**

J/le Aadan Xaashi Nuur

L. 402

## DAWLADDA HOOSE EE XAMAR

### WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

### HAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Cabdi Nuur Cali uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 18.10.86 uu ku weydiis tay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hawl-Wadaag Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisu na yihiin 27x3, kuna fadhiya mq. 81

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Jid

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri Dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Wadada Hawl Wadaag

B a r i Waxaa ka xiga: Guri Dad

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu ul fiisan uga arji karaa Maqaadda dhulka ootaal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 21 Dec. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA D/HOOSE

J/le Aadan Xaashi Nuur

L. 403

## WAAXDA DHULKA RASMIGA AH
## N A A D O   D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J/le Khadiija Siidow X. Cabdi uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/H ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 13.12.86 uu ku weydiis tay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 15x20 kuna fadhiya mq. 300

SOOHDIMAHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN.

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 116. F

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 120. F

Galbeed Waxaa ka xiga: Wadada Baicad

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lambar 117. F

Qofkii danaynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo yaal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (3) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 21 Dec. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA D/HOOSE
J/le Aadan Xaashi Nuur

L. 404

## DAWLADDA HOOSE XAMAR
## QAYBTA DHULKA RASMIGA AH
## N A A D O    D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J/le Maxamed Cabaas Suufi uu u soo qortay arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/H ee Muqdisho maalintii taariikhdu ahayd 9.12.86 uu ku weydiis tay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Shibis Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihin 21x4 kuna fadhiya mq. 84

**SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN**

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Guri Dad

Galbeed Waxaa ka xiga: Gurigiisa Hore

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karii muddo (30) Soddon Maalmood, laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 21 Dec. 1986

AGAASIMAHA WAAXDA MAAMULKA DHULKA D/HOOSE
J/le Aadan Xaashi Nuur

L. 405

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Maxamed Axmed Bulxan

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay 3 Jeeg War. Lam. kala yahay 0038694, 0936750, 0936749, kuna jirto lacg dhan Sh.So. 50.000, 100.000, 100 000, kuna qoran magaca J/le C/Rashiid Maxamed Diiriye sida ku cad warqadda Lam. 20305 Tr. 26.11.87, iyo keydka Soomaaliyeed L.Q.X.G

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee Tr. 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lambar kala yahay 0038694, 0936750, 0936749, Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Qaybta X/Guud kuna jirto Lacag dhan midkiiba sh.so. 500.000, 100.000, 100.000, kuna qoran magaca J/le C/Rashiid Maxamed Diiriye

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Labaad in ay siiso J/le Maxamed Axmed Bulxan lacagta caddeyntu tahay Sh.So. 50.000, 100.000, 100.000, oo ah bedelkii Jeegaga War. ee kor ku qoran markay kasoo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horay sa wax is hortaag ah aan laga keenin.

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 406

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE MARKA

HADDUU ARKAY: Dacwadda Kor Ku Qoran:

HADDUU ARKAY: Buugga Keydka Lam. 6480, lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. Marka kuna qorneyd lacag dhan sh.so. 11.000 (kow iyo Toban kun) uuna lahaa Cali Xasan Faarax sida ku cad warqadda Lam. Yahay 000598, Tr. Tahay 22.11.87, kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Marka.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. yahay 9 ee 11,9,1965, No 2.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B/Keydka lam. yahay 6480, kuna qoran magaca Cali Xasan Faarax, ayna ku jirto Lacag dhan sh.so. 11.000 (Kow iyo Toban Kun).

WUXUU AMRAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Marka u bedelo Cali Xasan Faarax, Buugga kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo waree gato muddo 15 maalmood gudahooda maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan laga keenin wax is hortaag ah.

Marka, 24.11.87.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GOB.. SH/HOOSE MARKA
(Sayid Sheekh Cumar)

L. 407

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Isaaq Rooble Maxamuud.

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lambar 0679015 kuna jirto lacag dhan sh.so. 22.250 kuna qoran magaca J/le Isaaq Rooble Maxamuud sida ku cad warqadda lam. 19806 Tr. 17.11.87 iyo keydka Soomaaljyeed Laanta Qeybta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee Tr. 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B/Keyd lam. 0689015 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Q/X/Guud kuna jirto lacag dhan sh.so. 22.250 kuna qoran magaca J/le Isaaq Rooble Maxamed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. laad in ay siiso J/le Isaaq Rooble Maxamed lacagta caddeyntu tahay sh.so. 22.250 oo ah beddelkii B/Keyd kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 17.11.87.

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 408

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Colow Guuleed

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lambar 0580359 kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca J/le Shamsho Jaaji Ibraahim sida ku cad warq adda lam. 20089 Tr. 23.11.87 iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lam. 2 ee Tr. 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lam . 0580359 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L. Q. X. Guud kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca J/le Shamsho Xaaji Ibraahim

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Labaad in ay siiiiso J/le Maxamed Colow Guuleed lacagta caddeyntu tahay sh.so. 50.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 23.11.87.

GARSOORAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 409

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Awaloow Shariif Maxamed;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0556180 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.000/= kuna qoran magaca J.le Muxyadiin Maxamed Geele sida ku cad warqadda Lam. 19887 Tr. 18.11.87 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis_Guud;

HADDUU ARKAY: Qod 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0556180 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.000/= kuna qoran magaca J.le Muxyadiin Maxamed Geele.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J.le Awaloow Shariif Maxamed lacagta ca_dadeedu tahay Sh.So. 22.000/= oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.11 1987

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 410

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Cabdulle Cabdi Ibraahim;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Buug Kayd Lam. 15155 iyo 2011 kuna kala jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 206.012.17/= iyo Sh.So 150.408.85/= isugeyn Sh.So. 356.421.02/= kuna qoran magaca J.le Cabdulle Cabdi Ibraahim sida ku cad warqadda Lam. 3028 Tr. 26.11.86 ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY:

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buugagga Kaydka ee Lam. 15155 iyo 2011 ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 356.421.02/= kuna qoran magaca J.le Cabdulle Cabdi Ibraahim.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J le Cabdulle Cabdi Ibraahim lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 356.421.02/= oo ah bedelkii Buugagga Kaydka ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.11.1987

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 411

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Suleymaan Cabdulle Cabdi.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lr. 18485 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 5.000 kuna qoran magaca J.le Suleymaan Cabdulle Cabdi sida ku cad warqadda Lamb. 3027 Tr. 26.11.87 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY; Qod 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lamb 18485 ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 5.000 kuna qoran magaca J.le Suleymaan Cabdulle Cabdi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J.le Suleymaan Cabdulle Cabdi lacagta cadadeedu tahay 5.000/= oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 28.11.1987

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 412

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Xasan Yuusuf Ismaaciil;

HADDU UTIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lr. 0967902-0967903 kuna jirto lacag dhan midkiiba Sh. So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Xasan Yuusuf Ismaaciil sida ku cad warqadda Lam. 20163, Tr. 24.11.87 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad;

HADDUU ARKAY: Qod 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0967902-0967903 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Xasan Yuusuf Ismaaciil.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad in ay siiso J/le Xasan Yuusuf Ismaaciil lacagta caddey ntu tahay sh.so. 200.000 oo ah bedelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 25.11.87.

GARSOORAHA MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 413

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cabdullaahi Macalin Maxamuud.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeegaga War. Lambar kala yahay 0940680, 0455102, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 100.000, 50.000, isugeyn 150.000, kuna qoran magaca J/le Xaliima Cusmaan Saciid sida ku cad warqadda lam. 19857 Tr. 18.11.87 iyo keydka So maaliyeed Laanta Qaybta Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod 69 sharciga Lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegaga War. Lambar 0940680, 0455102, Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Q.X. Guud kuna jirto lac dhan sh.so 150.000 kuna qoran magaca J/le Xaliima Cusmaan Saciid.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 2aad in ay siiso J/le Cabdullaahi Macalin Maxamuud lacagta caddeyntu tahay sh.so. 150.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 18.11.87.

GARSOORAHA MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 414

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cali Maxamed Faarax.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lambar 0712112 kuna jirto laccag dhan sh.so. 100.000 kuna qor an magaca J/le Xasan Aadan Shire sida ku cad warqad da lam. 28582 Tr. 26.10.87 iyo keydka Soomaaliyeed L.Q.X.G,

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee Tr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lam. 0712112 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Q/X/Guud kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca J/le Xasan Aadan Shire.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa in ay siiso J/le Cali Maxamed Faarax lacagta cad deyntu tahay sh.so. 100.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maa lmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 22.11.87.

GARSOORAHA MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 415

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Baashe Maxamed Faarax.

HADDUU TIXGELIYE: In uu lumay J/War. Lam. 0380651 kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca J/le Hilowle Maxamed sida ku cad warqadda lam. 28582 Tr. 26.10.87 iyo keydka Soomaaliyeed L/Q/Xis. Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee Tr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lam. 0380651 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Q/X/Guud kuna jirto lacag dhan sh.so. 50.000 kuna qoran magaca J/le Hilow Maxamed

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Afgooye in ay siiso J/le Baashe Maxamed Faarax lacagta cad deyntu tahay sh.so. 50.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maa lmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S, Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 22.11.87.

GARSOORAHA MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 416

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Maxamed Axmed Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Buug Kayd Lam. 27077 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 35.767.35/= kuna qoran magaca J.le Maxamed Axmed Faarax sida ku cad warqadda Lam. 002972 Tr. 30.11.87 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee Tr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug K Lr. 27077 ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So« 35.767.35/= kuna qoran magaca J.le Maxamed Axmed Faarax.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Maxamed Axmed Faarax lacagta cabadeedu tahay Sh.So. 35.767.35/= oo ah bedelkii Buug K. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.11.1987

GARSOORAHA MAXKAMADA GOBOLKA BANAADIR
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 417

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.leCanab Axmed Xersi;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lr. 0556645-0556646 kuna kala jirto lacag dhan midkiiba Sh.So. 40.000 iyo 50.000 isugeyn Sh.So. 90.000/= kuna qoran magaca J.le Canab Axmed Xersi sida ku cad warqadda Lam. 20511 Tr. 1 12.87 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis-Guud;
HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee Tr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0556645-0556646 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G. kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 90.000 kuna qoran magaca J.le Canab Axmed Xersi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco in ay siiso J.le Canab Axmed Xersi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 90.000/= oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horrey sa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 1.12.1987

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L 418

MAXKAMADDA G. W. GALBEED HARGEYSA

MGH/40/87 Hargeysa, 28.11.1987

UJ:- Degreeto cusboonaysiin J.W. lumay Lambar yahay 0519904 ee 12.8.87 Sh.So. 50.000/= kuna qornaa Maxamed Yoonis Warsame laga sameeyey Laanta laad ee Hargeysa.

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W. Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga iyo codsiga ee uu soo qortay Caasha Sh. Nuur Maxamed ee ay ku codsanayso in loo cusboonaysiiyo Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee ku taariikhaysan 16.11.87 ee uu Bangigu u kala diray Laamihiisa iyo xisaabaha Guud;

MARKUU ARKAY: Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee lambar yahay 001146 ee ku taariikhaysan 23.11 87 ee uu Bangigu ku soo caddeeyey in uu Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusani uu leeyahay astaamaha Ujeedada sare ku wada xusan;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii;

MARKUU ARKAY: In Lacagta Jeeggaasi Wareega ee kor ku xusan ay iska leedahay gabadha la yiraa Caasha Sh. Nuur Maxamed.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan la kansal gareeyo loona cusboonaysiiyo Caasha Sh. Nuur Maxamed, cusboonaysiintana gacanta laga saaro iyada ama ciddii Awood Buuxda ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib marka Faafinta lagu sameeyo.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa in uu nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G.W. Galbeed Hargeysa
(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

L. 419

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Yaasiin Maxamed Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0885624 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca J.le Xuseen Axmed Xuseen sida ku cad warqadda Lam. —— Tr. 5.12.87 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga War. Lambar 0885624 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Xuseen Axmed Xuseen.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad in ay siiso J le Yaasiin Maxamed Yuusuf lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000/= oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.12.1987

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 420

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Nuur Maxamed Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam 0539805 kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.250/= kuna qoran magaca J.le Nuur Maxamed Maxamuud sida ku cad warqadda Lam. 20698 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee Tr. 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0539805 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So 22.250/= kuna qoran magaca J.le Nuur Maxamed Maxamuud.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad in ay siiso J.le Nuur Maxamed Maxamuud lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 22.250/= oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.12.1987

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 421

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Xaaji Daahir Cigaal;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 2 Jeeg War. Lr. 0365215-0365688 kuna kala jirto lacag dhan Sh.So 50.000/ iyo Sh.So. 32.200/= isugeyn Sh.So 82.200/= kuna qoran magaca J.le Xaaji Daahir Cigaal sida ku cad warqadda Lr. 20899 Tr. 10.12.87 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeybta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. Lam. 0365215-0365688 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 82.200/= kuna qoran magaca J.le Xaaji Daahir Cigaal.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Hargeysa in ay siiso J.le Xaaji Daahir Cigaal lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 82.200/= oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 12.12.1987

GARSOORAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)